CHILD CARE LAW CENTER
P.O. Box 9066 • Berkeley, CA 94709
415-558-8005 • info@childcarelaw.org
www.childcarelaw.org

# Wax ka Ogow Sharciga ku saabsan Qodobka Senetka ee 234: Xeerka Carruurta Guriga u Soo Dhowaysashada

### 1. Muxuu qabanayaa Sharciga Senate-ka ee 234 (SB 234)?

Sharciga SB 234 ayaa si cad u qeexaya:

- Uma baahnid ogolaanshaha zoonka (zoning permit) ama shatiga ganacsiga (business license) si aad guri weyn ama mid yar oo qoyska ah si guriga aad ugu isticmaasho xanaanaynta ilmaha (child care). Wax uga ma jiro haddii aad degan tahay haddii kaleba meel guri la isku daray ama aan la isku darin (incorporated or unincorporated).[1]

- Waa la ogol yahay dhammaan guryaha xanaanada carruurta qoyska[2] oo dhan:
  - Guryaga halka qoys ah iyo kuwa laba-qoys ahba;
  - Guryaha abaartamentiga ah, guryaha kondomiiniyanka, guryaha tawnhaawuska; **iyo**
  - Qaybaha la degan yahay ee ku dhexyaala noocyada kale ee dhismayaha qoysas badan (multi-family buildings).[3]

- Magaalooyinka, degmooyinka (counties), mulkiilayaasha guryaha, maareeyayaasha guryaha, Ururada Mulkiilayaasha Guryaha (HOAs), shirkadaha caymiska, iyo guryi bixiyeyaasha kale ee kaama joojin karaan inaad guriga ka dhigato meelo ilmo lagu xanaaneeyo ilmo qoyska sababtoo ah waxaad ku nooshahay mid ka mid ah guryaha kor ku xusan.[4]

- Sababtoo ah waxaad leedahay ama aad qorsheyneysaa inaad yeelato guri yar ama guri weyn oo qoyska lagu xanaaneeyo, mulkiilayaasha guryaha, maareeyayaasha guryaha, ururada HOAs, shirkadaha amaahda guryaha, hantiilayaasha, iyo guri bixiyeyaasha kale **kuu ma**:
  - Diidi karaan inay guriga kaa ijaaraan,
  - Kaa saaraan ama kuugu hanjabaan inay guriga kaa saaraan, **ama**
  - Kuu diidaan inay guri kaa iibiyaan.[5]
  - Shirkadaha caymiska **kaa ma** kansali karaan ama kuu ma diidi karaa inay dib kuugu cusboonaysiiyaan ama mulkiilahaaga guriga sababtoo ilmo ayaad gugu ku xanaanaysaa ama qorsheyneysaa inaad ilmo guriga ku xanaanayso darteed.[6]

- Haddii uu qof kugu xad-gudbo xuquuqdaada sida bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka darteed ama codsade shatiga daryeelka ilmaha qoyska (child care license), waad awoodi kartaa inaad soo gudbiso faylagarayso cabasho Waaxda Xuquuqda Madaniga ah ee California (California Civil Rights Department): https://calcivilrights.ca.gov/ComplaintProc ess/.

- Maxkamada madaniga ah, waxaad sidoo kale aad dacwayn kartaa cid kasta oo ku xad gudubta xuquuqdaada guri bixiye ahaan daryeel ilmo qoys ku bixiye ahaan.[7]

Sharciga SB 234 wuxuu qusaysaa dhammaan guryaha xaraanada carruurta yar iyo weyn ee qoyska ee shatiga haysta ee **California**. Sharciga oo buuxa halkan ayaad ka akhrin SB 234.[8]

### 2. Goorma ayuu sharciga SB 234 dhaqan galay?

Sharciga SB 234 wuxuu dhaqan galay 1da bisha Janaayo, 2020. Waa sharci gobol, taas oo macnaheedu yahay inay khusayso qof kasta oo ku nool California.[9] Sharcigan ka ma shaqaynayo California meel ka baxsan.

### 3. Waa maxay ogolaanshaha soonaha?

Ogolaanshaha soonaha waa warqad ay ku siiso dowlada hoose ama magaalada (county) taasoo kuu ogolaanaysa inaad u isticmaasho gurigaaga ama dhulkaaga sabab gaar ah. Caadiyan ogolaanshaha soonaha waa inaad soo codsataa oo aadna lacag siisaa dowladda hoose ama degmada.

Dowladda hoose ama magaalada waxaa dhici karta inay ogolaanshaha soonaha ay magacyo kala duwan ugu yeeraan, sida:

- Ogolaanshaha isticmaalka shuruud ku xiran,
- Ogolaanshaha isticmaalka mas'uuliyiinta,
- Ogolaanshaha isticmaalka yar,
- Ugolaansho isticmaal, **ama**
- Ogolaanshaha Shaqo Guri.

Sida hoos timaada sharciga SB 234, dowladda hoose ama magaalada **ma awoodi** doonto inay kaaga baahato ogolaanshaha soonaha si guriga aad uga dhigato goob ilmo lagu xanaaneeyo.[10]

**4. Waa maxay shatiga ganacsiga?**

Shatiga ganacsiga waa ogolaanshaha ka soo baxa dowladda hoose ama magaalada si aad ganacsi u samaysato.

Dowladda hoose ama magaaladaada waxaa sidoo kale laga yaabaa inay ugu yeeraan:

- Lacagta ganacsiga, **ama**
- Canshuurta ganacsiga deegaanka.

Sida hoos timaada sharciga SB 234, dowladda hoose ama degmo **ma awoodi** doonto inay kaaga baahato shati ganacsi ama bixinta khidmad ganacsi ama cashuur ganacsi si guriga aad uga dhigato goob ilmo lagu xanaaneeyo.[11]

**Dowladda hoose ama magaaladeyda ma laga yaabaa inay qabaan xeer gaar ah ee loogu talagalay guryaha waaweyn ee xanaannada carruurta qoyska, xitaa haddii aysan u baahnayn ogolaanshaha soonaha?**

**Maya** Dowlada hoose iyo degmada **ma yeelan** karto sharciyo gaar ah ee loogu talagalay guryaha yar-yar **ama** guryaha waaweyn ee daryeelka carruurta qoyska.[12] Guryaha xanaanada carruurta ee qoyska yar iyo qoyska waa weyn waa in loola dhaqmaa sidii guri la dego oo loo isticmaalo si waafaqsan sharciyada deegaanka oo dhan.[13]

Bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka oo dhan waa inay raacaan isla sharciyada khuseeya guryaha kale ee aan lahayn xanaanada ilmaha.

Tusaale ahaan: Haddii guriga aad ku samayso isbeddel qaab ama dhismeed, waa inaad raacdaa aagaynta deegaanka iyo shuruudaha dhismaha ee khuseeya dhammaan guryaha kale.[14]

**5. Ma u baahanahay inaan u tago xafiisayga dowladda hoose ama degmadayda ka hor intaanan furin guri yar ama weyn oo qoyska ah guriga xanaanada ilmaha lagu bixiyo?**

**Maya** Uma baahnid inaad la xiriirto, u gudbiso waraaqaha rasmiga ah, ama aad ogolaansho ka hesho dowladda hoose ama xafiiska degmadaada si aad guriga uga dhex furato xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa. Waaxda Adeegyada Bulshada ee California (California Department of Social) , Qaybta shatiga Daryeelka Bulshada shatiyada, xeerarka, oo kormeera xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa.

**6. Halkee ayaan ka heli karaa xanaanada ilmaha gurigayga dhexdiisa?**

Waxaad xaq u leedahay in aad guriga dhexdiisa ka dhex furato xanaanoi yar ama weyn oo ruqsad u hesho xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa a oo ku yaala xaafadaha loo qoondeeyay isticmaalka soonaha. Sidoo kale waxaad aad sidaas ku samayn kartaa meel kasta oo soonaha hoose kuu ogolaato isticmaalka degaanka.[15]

Waxaad yeelan kartaa guri yar ama guri weyn xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ah:

- Guryaga halka qoys ah iyo kuwa laba-qoys ahba;
- Abaartment, kondomiiniyan, tawnhaawuska;
- Qaybaha la wada degan yahay ee ku dhexyaala noocyada kale ee dhismayaha qoysas badan (multi-family buildings,[16] **iyo**
- Guryo guurguura iyo guryo la warshadeeyay.[17]

**7. Ma ijaari karaa meesha aan ku haysto xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa?**

**Haa.** Milkiilayaasha guryaha, maareeyayaasha guryaha, Ururada Milkiilayaasha Guryaha (HOAs), shirkadaha caymiska, iyo bixiyeyaasha kale ee guryaha **kaa ma:**

- Joojin karaan inaad ijaarato kaliya sababtoo ah waxaad qorsheyneysaa inaad ilmo ku xanaanayso darteed ama waxaad leedahay shartiga xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa,
- Saari karaan inaad ijaarato kaliya sababtoo ah waxaad qorsheyneysaa inaad ilmo ku xanaanayso darteed ama waxaad leedahay shartiga xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa,
- Kuu ma diidi karaan inay kaa ijaaraan kaliya sababtoo ah waxaad qorsheyneysaa inaad ilmo ku xanaanayso darteed ama waxaad leedahay shartiga xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa, **ama**
- Ku ma dhibaatayn karaan ama xeerar adiga kuu guuni ah kugula ma dhaqmi karaan kaliya waxaad qorsheyneysaa inaad ilmo ku xanaanayso darteed ama waxaad leedahay shartiga xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa.[18]

**8. Sharciga SB 234 ma beddelaa mid ka mid ah shuruudaha dabka ee xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa?**

**Maya,** Sharciga SB 234 ma beddelaa mid ka mid ah shuruudaha dabka ee xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa.

Weli waa inaad:

- Buuxsaa shuruudaha dabka si aad u haysato xanaanada ilmaha ee qoyska, **iyo**

- Waa inaad ku baastaa baaritaanka dabka si aad u hesho shatiga daryeelka carruurta qoyska oo weyn.

Degmooyinka iyo magaalooyinka ma dhaqan gelin karaan xeerarka badbaadada dabka ee deegaanka ee ka baxsan waxa Xafiiska Dab-demiska Gobolka uga baahan yahay xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa.[19] SB 234 Xafiiska Marshal Dabdemiska Gobolka waxay u baahan yihiin inuu soo saaro tan hanuunin Shuruudaha dabka xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa.[20]

9. **Sharciga SB 234 ma beddelayaa mid ka mid ah shuruudaha caafimaadka iyo badbaadada gobolka ee shatiga xanaanada ilmaha qoyskayga?**

**Maya,** Waa inaad weli buuxsaa dhammaan shuruudaha caafimaadka iyo badbaada, iyo shuruudaha dabka si aad u hesho oo aadna u haysato shatiga xanaanada ilmaha ee qoyska.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan helitaanka shatiga xanaanada ilmaha ee qoyska, la xiriir:

- Ilaha Xanaanada Ilmaha iyo Wakaalada Gudbinta ee Deegaankaaga www.rrnetwork.org, ama
- Shatiga Xanaanada Jaaliyadda ee https://www.cdss.ca.gov/inforesources/community-care-licensing.

10. **Sidee ayuu sharciga SB 234 u abuuraa xanaano caruur oo badan?**

Sharciga SB 234 ka hor, shuruudaha deegaanka ee aan daruuriga ahayn iyo cadaalad darada ay kula dhaqmaan mulkiilayaasha guriga ayaa ka dhigay mid adag oo qaali ku ah dadka raba inay guriga dhexdiisa xanaano ilmo ka dhaxsamaystaan si ay u noqdaan guryo weyn xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ah. Maxaa yeelay sharciga SB 234 wuxuu meesha ka saaray qaar ka mid ah caqabadahaas, qoysas badan oo daryeelka xanaanada ilmaha ayaa hadda ka dhex furan kara oo noqon kara guryo weyn oo lagu xannaaneeyo carruurta si ay u daryeelaan carruur badan.

11. **Maxaa dhacaya haddii xuquuqdeyda lagu xadgudbo sida hoos timaada sharciga SB 234?**

Haddii qof uu ku xadgudbo xuquuqdaada hoos timaada sharciga SB 234,

- Warqadda xogta xaqiiqda tus.
- La xiriir Xarunta Sharciga Xannaanada Carruurta, adiga oo u maraya boggeena ama wac taleefankeena oo, ah (415) 558-8005 kadibna 101.
- Haddii aad tahay qof degan Degmada Los Angeles County, la xiriir La-taliyaha Dadweynaha, adiga oo u maraya boggeena ama wac taleefankeena oo ah (213) 385-2977 kadibna 300.
- Cabasho u gudbi Waaxda Xuquuqda Madaniga ah ee California https://calcivilrights.ca.gov/ComplaintProc ess/. Waxaan kugula talineynaa inaad la xiriirto Xarunta Sharciga Xannaanada Carruurta si aan kuuu sharaxno hanaanka cabashada.
- Dacwee qof ala qofkii ku xad gudubta xuquuqdaada guri bixiye ahaan daryeel ilmo qoys ku bixiye ahaan oo maxkad la tag.[21]
- Cabasho u gudbi Waaxda Caymiska ee California, gal https://www.insurance.ca.gov/01-consumers/101-help/index.cfm, haddii shirkadda caymisku ay ku hanjabto inay kuu cusboonaysiin waayaan caymiskaaga ama mulkiilaha gurigaaga sababtoo ah waxaad guriga ku xanaanaysaa ilmo darteed.

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo wixii ilo ah, booqo bogga Xarunta Xeerka Daryeelka Carruurta ee https://www.childcarelaw.org/child-care-providers/housing-rights/

---

**© Child Care Law Center 2024**

Waxaa qoray qareennada jooga Xarunta Xeerka Daryeelka Carruurta. Si aad u hesho ogolaansho ah inaad nuqul ka sameyso, gudbiso ama la wadaagto macluumaadkan, iimeel noogu soo dir: info@childcarelaw.org

**Macluumaad *Sharci* – Oo Ma aha Talo *Sharci*.** Daabacaadan waxaa loogu talagaly inay kuu fidiso macluumaad sharci ah; maaha talo sharci. Xarunta Xannaanada Carruurta maaha qareenkaaga. Sharcigu inta badan wuu is-isbedelaa. Wixii talo ah ee ku saabsan xaaladdaada gaarka ah, qareen la xiriir.

**Dhammaad:** Qoraallada hoose waxaa laga soo xirtay linkiga sharciyada California iyo xuquuqahaaga mawduucan quseeya. Iska akhri iyo/ama la xiriir maktabadda sharciga deegaankaaga. Waxaa dhici karta inay kaa caawiyaan inaad fahamto sharciyada.

---

**Dhammaad:**

1 *Fiiri* Cal. Caafimaadka & Xeerka Badbaadada (Health & Safety Code §§) 1597.40(b), 1597.41(a)-(c), 1597.42, 1597.43(a), 1597.45(a).

2 Cal. Xeerka Caafimaadka & Xeerka Badbaadada § 1596.78(a)-(d) (Xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa waa "xarun si joogto ah u siiya daryeel, xanaano, iyo ilaalin 14 ama ka yar, guriga bixiyaha, muddo ka yar 24 saacadood maalintii, marka waalidka ama mas'uulka ay maqan yihiin....").

3 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1596.78(d), 1597.45(f).

4 *See* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1597.40(b), 1597.41(a)-(c).

5 *See* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c), Cal. Xeerka Madaniga ee § 1942.5(a) (Guri ka saarida ama hanjabaad ka saarid aargoosi loo gaysto kiraystaha si sharci ah oo nabada leh oo uu u isticmaalo xuquuq kasta oo sharci ah waa xadgudub sharci).

6 *See* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c); Cal. Ins. Xeerka §§ 676 (guryaha xanaanada ilmaha qoyska ku ma qorna liiska sababta la ogol yahay in la joojiyo sharciga caymiska), 676.1 (iyaga oo sheegaya in shirkadaha caymisku aanay si sabab la'aan ah ugu fashilmi karin inay cusboonaysiin waayaan sharciga sababtoo ah qofka caymiska ku jira wuxuu leeyahay guriga xanaada carruurta qoyska ku bixiyo iyo caymiska uu ku jiro mulkiilaha gurigu ma dabooli karaan mas'uuliyadda ka dhalata ama la xiriira guriga xanaanada carruurta qoyska). 679.74 (ka mamnuucida shirkadaha caymisku inay joojiyaan ama diidaan codsiga caymiska deegaanka ee ku salaysan isha dakhliga).

7 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(e).

8 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1596.70 *et seq*.

9 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1596.70 *et seq*.

10 *See* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1597.40(b), 1597.41(a)-(c), 1597.42, 1597.43(a), 1597.45(a).

11 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.45(b).

12 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.45(e).

13 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1597.42, 1597.45(a). Sharciga (SB 234 wuxuu meesha ka saaray shuruudihii mar dowladdaha hoose iyo magaalooyinka u ogolaan jiray inay xeerar u soo saaraan meelaha kala dheeraynta & fiirsashada, xakamaynta taraafikada, baarkinka, iyo xakamaynta qaylada).

14 *Fiiri* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.45(e).

15 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1597.42, 1597.43.

16 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1596.78(d), 1597.45(f).

17 Guryaha xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa waxaa ka mid ah "…qayba la degan yahay ee la ijaartay, la liisgaraystay, ama milki ahaan loo leeyahay" sida hoos yimaada Qaybta 455.2 ee ah Sarciga 2022 ee Xeerka California Building Code, ee quseeya ammaanka dabka ee loogu talagalay guryaha xanaanada carruurta. Qodobka 14 ee la xiriira badbaadada dabka ee Xeerka Sharciga California ee kaabaya Xeerka Dhismaha California waxa uu qeexayaa "qaybta deggenaanshaha" sida "qayb la dego," oo ay ku jiraan guryaha wareegga ah iyo guryaha la farsameeyey. Cal. Xeerka Sharciyada., qodobka. 14, § 1267.00 (a).

18 *Fiiri* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1597.41(a)-(c), 1597.45 (e); Cal. Xeerka Madaniga ee § 1942.5(a) (Guri ka saarida ama hanjabaad ka saarid aargoosi loo gaysto kiraystaha si sharci ah oo nabada leh oo uu

u isticmaalo xuquuq kasta oo sharci ah waa xadgudub sharci).

[19] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.46(c).

[20] *Fiiri* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.46(c).

[21] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(e).